

FARRIIN KU SOCOTA WAALIDIINTA IYO DARYEELLAYAASHA

Waalidiinta iiyo daryeellayaasha qaaliga ah,

Waad ku mahadsan tihiin dhamaan kaalmadiinii asbuucyadaan la soo dhaafay ee barashada kala-jaadka ah ee durugsan.

Iyada oo la raacayo talada Sarkaalka Madaxa Caafimaadka, Xukuumada Dawlada Fiktooriya waxay kula talisay in ardadu ku soo noqon karaan dugsiga iyada oo heer heer ah.

Heerka ugu horreeya, ardadu ku jirta Prep-ka, fasalka 1aad iyo 2aad, ardada dugsiga sare (sanadaha 11aad iyo 12aad VCAL iyo VCE) iyo dhamaan ardada dugsiyada takhasuska ah ayaa ku noqon doona dugsiga 26da May.

Ardada fasalka 10aad oo samaynaya waxbarashada VCE, oo ay ku jirto waxbarashada VCE VET, ayay waajib ku tahay inay tagaan dugsiga marka ay suurtoobi karto. Haddii tani aanay u suurtoobin cunugaaga/carruurtaada, macalimiintayada ayaa xaqiijin doona shaqada la siinayo ardada tegaysa dugsiga oo siinaya ilmahaaga/carruurtaada.

Si loo kaalmeeyo dhamaan shaqaalaha dugsiga si loogu diyaariyo safarkaan, Isniinta 25ka May ayaa noqonaysa maalinta ardadu fasaxa yihiin.

Heerka labaad ee ku noqoshada rugta dugsiga, dhamaan heerarka dugsiga ayaa ku noqon doona dugsiga laga bilaabo Talaadada 9ka Juun.

Ardada aan lagu kormeeri karin guriga iyo ardada u nugul dhibta, habka hadda jira ee ku-barashada dugsiga ayaa sii shaqayn doonta mudada labada asbuuc ah oo ka bilaabanaysa 26da May kuna dhamaanaya Talaadada 9ka Juun. Qaabka hadda jira oo aan isticmaalayno si loogu suurtageliyo waalidiinta iyo daryeellayaashu inay xusaan maalmaha ama qayb-maalmeedka wax ku barashada dugsiga ayaa looga baahan yahay inuu sii socdo mudadaan labada asbuuc ah.

Ardada kale oo dhan oo ku jirta fasalkaan iyo heerarka sanadka ayaa ka sii wadi doona guriga ilaa maalinta Talaadada 9ka Juun.

Marka heer sanadeed walbaa soo noqdo, ardada oo dhan waxaa laga filayaa inay u yimaadaan dugsiga si caadi ah. Taas macneheedu waxa weeye haddii aad go'aansato inaad ilmahaaga ku hayso guriga ka dib heer sanadeedkoodu inay ku soo noqdaan goobta wax ku barashada, kuma sii kaalmayn karno waxbarashadooda guriga.

Taasi ma khusaynayso carruurta u baahan inay maqnaadaan sababa la xiriira caafimaadkooda. Qoysaskaasi, fadlan ha nala soo xiriireen si aan ugu samayno qorshaha ku haboon.

Isla qaabkaas ayaa waxaa sameeya dugsiyada Dawlada ee ku yaalla Fiktooriya.

Si loo kaalmeeyo caafimaadka iyo samaqabka ardadeena iyo shaqaalaha dhamaantood, dugsigayagu wuxuu sii wadi doonaa nadiifin la joogteeyey wuxuuna dhiirrigelin doonaa gacma dhiqida joogtada ah.

Haddii ilmahaagu jiran yahay ama dareemayo caafimaad daro, waxaa waajiba in aanay dugsiga imaan.

Markii Sarkaalka Madaxa Caafimaadka uu ku taliyey in aan ardada looga baahnayn inay sii wadaan kala-durugsanaanta bulshada dugsiga, waxaa jiri doona dhowr isbedel oo ah hawlgalada

dugsigeena, kuwaas oo la jaanqaadaya talada caafimaadka dhamaan dugsiyada halkan ku yaalla <https://www.education.vic.gov.au/about/department/Pages/coronavirus.aspx>

Tan ayaa shaqayn doonta ilaa amar dambe. Waxaan bixin doonaa macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan dugsiyada maxaliga ah sida ugu dhaqsaha badan, laakiin waa muhiim inaad ogaato in isbedelkaas ay ku jiri doonaan:

- Qabanqaabin la isku dubariday xagga dhigista iyo qaadida ilmaha, oo uu ku jiro laablaabka dugsiya waqtiyadiisa bilawga iyo dhamaadka
- Caqabadaha ka jira helitaanka goobta dugsiya ee qof kasta oo aan ka ahayn shaqaalaha dugsiya iyo ardada;
- Sida aan u qaadno kulamada macalinka iyo waalidka iyo waraysiyada.

Waan fahamnay in qoysaska qaarkood laga yaabo inay dareemaan walaac wixii ku saabsan talaabadaan ku noqoshada fasalka barida iyo barashada. Waxaan kuu xaqiijin karaa in go'aankaan loo qaaday sababa la xiriira talada ugu fiican oo caafimaadka laga heli karo Dawlad Goboleeddeena.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saasan ku noqoshada dugsiya iyo coronavirus-ka (COVID-19) ayaa laga helli karaa websaytka Wasaarada, kaas oo loo cusboonaysiinayo si joogto ah:

<https://www.education.vic.gov.au/about/department/Pages/coronavirus.aspx>

Waa ku mahadsan tihiiin kaalmadiina joogtada ah iyo saburka inta waqtigaan la jiro. Waxaanu sugaynaa ku soo dhowaynta ardadeenu inay ku soo noqdaan fasalka.